

Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023: Tallaabooyinka Muhiimka ah ee lagu Dhisayo Guryo Badan, Taageeridda Dabaqadda Dhexe, oo Laga Dhigo Noloshaha Mid la Awoodi karo

Tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu qeexay *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023* waxaa ka mid ah:

Qorshaha Waxqabadka Guriyeynta Kanada

- Sanduuqa dardargelinta guriyaynta ee \$4 bilyan, kaasoo ka caawinaya jarista caqabadaha cas iyo in la dhiso in ka badan 100,000 guryo cusub ah guud ahaan Kanada, si dhakhso leh;
- [Dib u soo celinta dhulal badan oo federaal ah si looga dhiso guryo](#);
- Ka saaridda GST-da xagga guryaha kirada ah ee cusub, oo ay ku jiraan shirkadaha guriyaynta ee iskaashatada ee bixiya kirooyinka muddada dheer;
- [Furitaanka \\$20 bilyan ee maalgelinta jaban ee dhismaha kiraynta](#) si loo dhiso ilaa 30,000 oo guryo dheeraad ah sannadkiiba;
- In la maalgeliyo guryo badan oo kiro ah iyadoo la siinayo \$15 bilyan oo amaah ah iyadoo loo marayo Barnaamijka Amaahda Dhismaha Guryaha, si loo dhiso 30,000 guri cusub ah;
- In la dhiso guryo la awoodi karo oo loogu talagalay dadka Kanadiyaanka ah ee aadka u nugul iyadoo \$1 bilyan loogu talagalay Sanduuqa Guriyeynta La Awoodi karo, si ay uga caawiso dhisidda in ka badan 7,000 oo guri cusub ah;
- In la jebiyo caqabadaha xagga dhaqdhaqaaqa shaqaalaha Kanada, iyadoo mudnaanta la siinayo shaqaalaha dhismaha iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, iyo kala hormarinta dadka xirfadda leh ee degganaanshaha joogtada ah;
- Burburinta kiraynta muddada-gaaban ee aan waafaqsanayn iyo taageeridda fulinta dawladda hoose xagga xannibaadaha kiraynta muddada-gaaban; iyo,
- Axdiga Amaahda Kanada oo cusub si loo hubiyo in dadka Kanadiyaanka ah ee khatarta maaliyadeed ugu jira inay heli karaan kaabista amaahda guryaha ee ku habboon ee ay ka filan karaan bangigooda si ay uga caawiyaan inay lacagahooda bixiyaan oo ay guryahooda joogaan.

Taageerida Dabqad Dhexe oo Xooggan

- [Xoojinta tartanka Kanada](#), taas oo macnaheedu yahay qiimo jaban iyo doorasho badan, iyada oo dib u habeyn lagu sameeyo sharciga si loo xakameeyo dhaqamada aan caddaaladda ahayn ee kor u qaada kharashka;
- Hubinta shanta silsiladood ee raashinka ugu waaweyn Kanada inay ilaaliyaan ballanqaadkooda ah inay dejiyaan qiimaha, iyo [horumarinta tartanka qaybta raashinka](#);
- Ka saaritaanka GST-da xagga teraabiyada cilminafsiga iyo adeegyada la-talinta, si daryeelka caafimaadka dhimirka looga dhigo mid ay awoodi karaan dadka Kanadiyaanka ahi;
- Sii wadida la dagaalanka kharashyada beenta ah, oo ay ku jirto [hoos u dhigidda kharashka sanduuqa lacagaha aan ku filnayn \(NSF\)](#) ee ay bangiyadu qaataan, baadhista qiimaha mobaylada wareega ee caalamiga ah, iyo hubinta in diyaaraduhu ay fadhiisiyaan dhamaan carruurta da'doodu ka yar tahay 14 sano meel ku xigta qofka weyn ee weheliya kharash la'aan. ;
- Wax ka beddelka sharciga si loo taageero xaqa ay dadka Kanadiyaanka ahi u leeyihiin inay hagaajiyaan qalabkooda iyo alaabadooda iyagoo ka hortagaya soo saarayaasha inay diidaan inay bixiyaan habka lagu dayactirayo si ka soo horjeedda tartanka;
- Lacagta faa'iidada Caymiska Shaqaalaynta ee cusub, kaas oo siin doona 15 toddobaad oo faa'iidooyin la wadaagi karo xagga waalidiinta; iyo,
- [Kobcinta xisaabaadka bangi ee jaban iyo kuwa bilaa kharash ah](#) si loo muujiyo xaqiiqada bangiyada casriga ah iyada oo la magacaabay hal dhexdhexaadiye madax-bannaan si looga caawiyo dadka Kanadiyaanka ah inay xalliyaan cabashooyinka dhanka bangiyada.